

## DIB U EEGIDDA SHURUUDAHA QALLAN-JEBINTA

### Diiwaangelinta Degmo Dugsiyeed

#### **Tallaabada 1:**

Shuruudaha Liiska Warbixinta Ardayga Cusub (Diiwaan-galinta Dhexe) iyo Rayi Ururinta Luqadd ee MN

#### **Tallaabada 2aad:**

Go'aami Da'da Ardayga

17 ama ka yar yahay, horay ugu soco hanaanka diiwaangelinta ee talaabada 3

18 ama ka wayn yahay.

- Haddii aysan ahay EL, la xiriir la Taliyaha Dugsiga si dib loogu eego dhibcaha/buundooyinka loogu talagalay dalabyada waxbarasho ee lagu taliyay:
  - Qaabka waxbarasho ee lagu taliyay waxaa lagu salayn doonaa -
    - tirada dhibcood ee ardayda uu haysto ee ku JIHAYSAN shuruudaha, qalin-jabintaiyo
    - tirada dhibcood ee la iska rabo in la kasbado ka hor inta ardaydu uusan gaarin da'da 21 jir
  - La Taliyaha Iskuulka ayaa kala hadli doona qoyska dalabyada si loo go'aamiyo qaabka waxbarasho.
    - Haddii tirada dhibcood ee loo baahan yahay in la kasbado ay ka badan tahay xaddiga wakhti ee ardayga u soo haray ka hor inta aysan noqon da'da 21 jir, ka dib Shahaadada Dugsiga Sare ee Qof qaangaar ah ee ABE waxay noqon doontaa dalabka ugu horeeyo ee lagu taliyay. Haddii la xushay, markaa kulan qaadasho oo ABE ayaa la ballamin doonaa.
- Haddii EL, la xiriir la Taliyaha Iskuulka iyo Isuduwaha EL si qoyska iyo dadka kale ee ay quseyso la iskula fiiriyo dhibcaha/buundooyinka iyo dalabyada la haysto ka dibna loo go'aamiyo talooyinka la soo jeediyo ee qaabka waxbarasho ee la soo jeediyo.
  - Qaabka waxbarasho ee lagu taliyay waxaa lagu salayn doonaa -
    - tirada dhibcood ee ardayda uu haysto ee ku JIHAYSAN shuruudaha, qalin-jabintaiyo
    - tirada dhibcood ee la iska rabo in la kasbado ka hor inta ardaydu uusan gaarin da'da 21 jir
  - Isuduwaha iyo Xiriiriyaha ayaa kala hadli doona qoyska dalabyada si loo go'aamiyo qaabka waxbarasho.
    - Haddii tirada dhibcood ee loo baahan yahay in la kasbado ay ka badan tahay xaddiga wakhti ee ardayga u soo haray ka hor inta aysan noqon da'da 21 jir, ka dib Shahaadada Dugsiga Sare ee Qof qaangaar ah ee ABE waxay noqon doontaa dalabka ugu horeeyo ee lagu taliyay. Haddii la xushay, markaa kulan qaadasho oo ABE ayaa la ballamin doonaa.

#### **Tallaabada 3:**

Hanaanka Waraysiga/Diiwaangelinta

- Haddii EL aysan ahayn, markaa la kulan la Taliyaha Iskuulka si loo go'aamiyo fasalka fasalka

iyo dhabaha qalin-jabinta Tallaabada 4 (waxaa loogu talagalay EL kaliya):

Haddii warqadda buundada imtixaanada ama diiwaangelinta imtixaanka ay taalo, fadlan u soo dir kooxda dib u eegidda ee u qaabilsan.

- Diiwaangelinta ayaa go'aaminnaa ha noqoto ama yaysan noqon haddii la imtixaanayo adeegyada EL iyo in kale
  - Haddii imtixaan loo baahdo macalimiinta EL ee dhismaha iskuulka ku jirta ayaa ardayda imtixaanka ka qaadi doona
  - Xogta imtixaanka u diri doona:
    - Dugsiga Sare - La Taliyayaasha iyo Malinka EL\*
    - Dugsiga Dhexe - Kooxda Dhismaha iyo Macalinka EL\*
    - Dugsi Hoose - Macalinka EL\*
  - \*Kooxda loo aqoonsaday ee dhismaha ku jirta ayaa ka gaari doonta go'aan ku saabsan meelaynta adeegyada.
- Haddii EL ay tahay, markaa waxaa la la kulmayaa la Taliyaha Iskuulka iyo Xiriiriyaha EL si loo go'aamiyo fasalka iyo dhabaha qalin-jabinta. (qoyska waxaa la siinayaa qoraal ku qoran JADWAL, qoraalka JADWALKA EL, ama Qoraalka ABE)

#### **Tallaabada 5 (waxaa loogu talagalay EL kaliya):**

**Heerka hoose** (Fasallada K-5) ardayda si toos ah ayaa loogu qoraa iyadoo la fiiryo da'da ilmaha. **Heerka Dugsiga Dhexe** (Fasallada 6-8), ardayda waxaa si toos ah loogu qoraa iyadoo la fiiryo da'da ilmaha ama imtixaanka ama dukumentiyada iskuulka hore laga helo. Kooxda dib u fiirisa ee xilsaaran ayaa dukumentiga eegi doonta oo ardayga ku qori doona fasalka/fasallada ku haboon. La Taliyayaasha waxay kala hadli doonaan barnaamijyada waxbarasho iyo

heerka fasal Ardayda iyadoo lagu salayayo natiijooyinka iyo buundooyinka hore ee Imtixaannada. **Heerka Dugsiga Sare** (Fasalada 9-12), ardayda si taas ayaa waxaa loo fariisiiyaa sida ardayda fasalka 9aad ilaa laga dhammaynayo imtixaanka ama la helayo dukumentiyada haboon. Kooxda dib u fiirisa ee u xilsaaran ayaa dukumentiga eegi doonta oo ardayga ku qori doonta fasalka/fasallada ku haboon. La Taliyayaasha Iskuulka kala hadli doonaan barnaamijyada waxbarasho iyo heerka barnaamij akadeeyi iyo heerka fasal iyadoo lagu salayayo Imtixaanka iyo buundooyinka ardayga ee horey uu u haystay.

09/2014